# IFTIINKA - AQOONTA
# (LIGHT of EDUCATION)

## AFFAR IYO TOBNAADLE
## (FORTNIGHTLY)



WAKIILKA MAAMULA

QORAHA
Shire Jaamac Axmed

MUQDISHOW
Soomaaliya
December 25 1966

## FARTA FURAHEEDA

*Dhawaaq gaaban:* a i e o u

*Dhawaaq dheer:* aa ii ee oo uu

### XURUUFTA

| *Xarafka* | | | *Erayga* | |
|---|---|---|---|---|
| b | | — waa bir | — waa bal | — waa bad |
| t | | — waa tin | — waa tog | — waa takar |
| j | | — waa jiis | — waa jid | — waa jaad |
| x | ح | — waa xas | — waa xil | — waa xishood |
| kh | خ | — waa khamro | — waa khad | — waa khayr |
| d | | — waa duub | — waa dab | — waa dii |
| r | | — waa rabi | — waa run | — waa ruun |
| s | | — waa sin | — waa sun | — waa suun |
| sh | | — waa shan | — waa shib | — waa shir |
| dh | ط | — waa dhir | — waa dhul | — waa dhal |
| c | ع | — waa caro | — waa ceel | — waa ciil |
| g | | — waa giddi | — waa gal | — waa goob |
| f | | — waa faras | — waal fal | — waa fallaar |
| q | ق | — waa qab | — waa quul | — waa qool |
| k | | — waa kab | — waa kulayl | — waa koob |
| l | | — waa laan | — waa lun | — waa labo |
| m | | — waa maro | — waa maal | — waa miis |
| n | | — waa nabar | — waa ńal | — waa naag |
| w | | — waa war | — waa wan | — waa wiil |
| h | | — waa hooyo | — waa hal | — waa hadal |
| y | | — waa yey | — waa yar | — waa yaanbo |
| ’ | | — waa rì | — waa lo’ | — waa la’aan |

## SAYID MAXAMAD (Ina-Cabdille Xassan)

Sayid Maxamad wuxuu ahaa ninkii qabiilooyinka Soomaali-da oo dhan isku daray, oo isku mid ka dhigay. Soomaalidu aya-doo kala firiirsan ayuu assagu isku daray.

Gobannimada maanta la haysto issaga iyo daraawiishtii ayaa soo dhaliyay. Daraawiishtu nafteedii ayay u hurtay xorni-mada iyo gobannimada Soomaaliyeed. Gumeysigu markii uu diiday inuu dhulka Soomaalida ka tago, ayaa Sayidkii dagaal ku kacshay. Wuxuu issugu yeeray dadkii Soomaalida ahaa oo dhan inay la diriraan, saddex cadow — Ingriis iyo Talyaani iyo Amxaaro — oo dhan mar keliya. Saddexdaas cadow way ka xoog badnaayeen, laakiin Sayid Maxamad iyo daraawiishtii way ka adkaan waayeen.

Dagaalka Sayidku iyo gumeysigu wuxuu bilowday runtiisu sanadii 1900 wuxuu na dhammaaday 1922. Nimanka taariikhda dhigaa waxay intaas ku daraan laba sano oo qalqaalo ah. Sayid Maxamad wuxuu ahaa ninkii keliya oo Afrika intii 22 sano ah da-gaal waday. Taktiigga dagaalka aad buu u yaqiin. Taassi na wa-xay ahayd middii gumeysiga ka wareerisay. Had ba dagaal kadò ah, ayuu meel kaga dhuffan jiray. Fardo badan oo orod-dheer na wuu lahaa. Dhulka na aad iyo aad buu u yaqiin. Qarnigii 16 sidoo kale waxaa dagaal ku kacshay Amxaarada Axmad Gurey. Wax badan baa dagaalkii Axmad Gurey socday.

Sayid Maxamad markii uu dagaalka ku bilaabay gumeysiga, dadka Soomaalida ahi, uma bislayn middaas. Sidaas daraaddeed waxaan ku aragnaa gabayadiisa calaacal uu ka calaacalayo Soo-maalida.

Sayid Maxamad ma uusan doonayn Boqortooyo sida Sul-daammada kale oo Afrika degganaa. Taas waxaa ku tussaya ha-dalladiisii uu kula hadlay markii dhawr jeer Ingriisku u bandhi-gay Boqortooyo inuu qaadto, dagaalka na joojiyo. Sayid Maxa-mad wuu diiday taas.


Wuxuu gabay ku yiri:

Anigaan Faranji dooradu ku taal      nabad ka doonayne
Anaa diiday maantuu lahaa      deeqan iga hooye


Sayid Maxamad dagaalka wuu kaga adkaa nimankii kale oo Afrikada woqooyi iyo woqooyi-bari ka dirirayey. Wuxuu dagaal ka badnaa CURAABIGII MASSAR iyo MAHDIGII SUUDAAN.

Weli taariikhda Afrika ma arag Sayid Maxamad oo kale, Gumeysigu markii uu jebin waayey, wuxuu u cuskaday inuu la dhaco bambo oo uu duqeeyo. Meelshii keliya oo Ingriisku dayuu-rado uu u cuskaday ayay ahayd Soomaaliya. Taas na waxay ahayd





Sayid Maxamad (Ina-Cabdille Xassan) aabbiihii dhaqdhaqaaqa gobonnimada Soomaaliyeed. Massawirkaan waxaa laga soo guu-riyey joornaal Carabi ah.



Dhismaha Taleex wuxuu bilawday 1910, waxaana lagu duqee-yey dayuurad 1920. Amarka duqaynta waxaa bixiyay Madaxda-wisaaradda Ingriiska Winston Churchill.

qalcadii TALEEX. Sida runta ah taas gumeysiga uma ahayn libin. Maxaa yeelay markii u lug iyo madaafiic waaweyn uu ku jebin waayey, ayuu u cuskaday dayuurado.

Waxaa jirtay in Ingriisku dood Sayid Maxamad dagaalkiisa ku saabsan, uu ka furay guriga Ingriiska oo Barlamaanka ah (House of Common). Meelshaas in looga hadlay khassaartadii uu ku dhigay Sayidku. Niman badan oo Barlamaanka Ingriiska ku jira, aya ka qayliyey, oo diiday Dawladda Ingriisku inay lacag badan ku bixiso dagaalka Sayidka.

Dawladda Ingriisku se waxay la noqodtay middaasu ceeb, inay ka noqodto dhulkii. Khassaarto badan lacag iyo naf iyo hub ah, ayay u soo jiidday Ingriiska. Kaddib na cadownimo danbe, ayay dhaxalsiisay Ingriiskii. Raad danbe na way ku reebtay labadii dhinac ba. Dagaalkiisii Soomaali magac uma horeeyn. Sayid Maxamad dagaal-yahan, keliya muusan ahayn. Wuxuu ahaa Aabbihii gabayga Soomaalidoo dhan mid hore iyo mid danba ba. Badi gabayadiisii waa la hayaa. Mahaddu na waxay u noqonaysaa ninkii uu gabayga u dhiibi jiray, oo la dhihi jiray «XUSSEN DHIQLE». Ninkaasu dadka Soomaalida ah, wuxuu ku leeyahay xussuus weyn iyo abaal aan la gudi karin. Maxaa yeelay wuxuu ahaa ninkii gabayada Sayidka noo dhawray assagoon Af-Soomaaligu dhigayn.

Ardada Soomaalida, waa in la baraa, oo loo dhigaa gabayadiisa, intii loo dhigayo SHAKESPEAR ama DANTE iyo SHAWQI. Anigu ma diiddani in la barto gabayada nimankaas waaweyn oo dunida magaca ku le, illowse waa in ardada Soomaalida la baraa marka hore GABAYADOODA, kaddib na kuwa kale.

Dawladda Soomaalidu — siiba Ministarka Aqoonta — waa inay u bilaabaan ardada gabayada Sayidka oo ay ogaadaan taarikhda dhulkooda. Waxaa inoo eg inaan u dhisnaa Sayidka malluug-weyn (Statue) oo jidad badan na lagu magacaabaa.

Sayid Maxamad waa inuu inoo noqdaa «calaamaddii — xornimada». Sida uu ugu yahay LINCOLN Ameerika, ama LINEN ugu yahay Ruusiya.

---

## CALAACAL

Bal aan gabaydiisii calaacalka ahaa, wax ka aragno. Mar uu Soomaali oo idil ka calaacalyey wuxuu yiri:

Xusseenow- caqligu kaama tago      idan Ilaahaye
Hallaguu aqbalo duco san baan      kuu akhriyayaaye



Ifkana waayo noo joog nimaan      aaminaa tahaye
Haddaad ummaado waan kugu hubaa      Ina-odow khayre
Assaxaabihii baad u tegi      udugga weynaaye
Irdihii jannada inaad ka geli      waan ogsoonahaye!!
Orah kale na waa eray yaroon      kuu erganayaaye
Alla igama qaadow! adaan      kala illoweyne
Aadaanka maqal waa salaad      loo addimayaaye
Ilaahii abuuray ba kuwii      diiday amarkiisa
Anbiyaalihii iyo kuwii      awliyada caayey
Cuqaalshii dariiqada kuwii      awlaxa u qaadtay
Kuwii ubad nassaareed noqdee      Faranji aanaystay
Ikhyaarkooda nimankii kufriga      ugu adeegaayey
Aan lagu ikraahine kalgacal      ugu abraaraayey
Ee yiri Amxaaraanu nahay      Adari na u guuray
Ee Mililiq aabbe u yahee      u arrin qaadaayey
Ee Xabashi eyga u noqdee      u ololaynaayey
Nimankii assaayada dhigee      dunida aaheeyey
Ee Aw-Cabbaas dilay dadkoon      eedi kala gaarin
Ee uunka kala fiijiyee      kala irdhaysiiyey
Ee Eeragoo iyo i dhigay      Aida-Daratoole
Nimankii ikhwaanka jaray      aabiga na u laayey
Raggi Ehelu-khayrkii warmaha      kala ijjoon waayey
Ee umal daraaddiis girliga      igu affuuffaayey
Nimankii idiil dagaal      iigu iman waayey
Ee aan inkaaree madfaca      ololi ii haystay
Ee ubax-caddaydii hàrtiga (1)      oofta kaga joojey
Nimankii iniinaha ka dhigay      Ilig wixii joogay
Ee Eera-goo iyo Batala      igu aguumeeyey
Ee omoska Beer-dhiga tukaha      igu ormeysiiyey
Nimankii ayaantii Gunburo      obòda ii keenay
Argalkiyo rassaastii kuwii      igu ijbaaraayey
Nimankii uluuf iyo uluuf      igu agoomeeyey
Nimankii arlada Eebbahay      igu ugaareeyey
Nimankii awaaraha buska le      igu eryoonaayey
Nimankii abaartii Caleed      bari i aadsiiyey
Ardaalshii Jidbaale i helshee      igu anuun goysey
Nimankii Ibleys igu diree      iga ijjoon waayey
Nimankii ujuurada cunee      iibka ii bixiyey
Abaalkayga nimankii baxshee      i istixyeyn waayey
Ahabtiyo ergeyntii kuwii      lagaga ày waayey
Nimankii ijaabada ka tegay      aakhiruu sabanka
Nimankii addunyada dhacee      ariyo geelii ba
Anigoo Islaama ba kuwii      ii arxami waayey
Nimankaan Allahyow lahaa      eyda iga doortay
Nimankii urugò iyo ciil      igu abaadsiiyey
Nimankii ilmada iga qubee      oohin iga keenay
Nimankaan ku alàlàday markii      uunku wada jiiffay
Nimankii intaas igu faloon      i assarraraynnin
Wax ba yaan ardina layga siin      ilindidaydiina
Mar uunbaa addomaha Ilaah      iiga aargudine!!!»

*(1) (bunduqa ama qoriga)*

## GOOBIHII DAGAALKA TAARIKHDA LAHAA OO SAYIDKA IYO INGRIISKA DHEX MARAY.

1. Firdiddin
2. Gumburo
3. Jidbaale
4. Batala
5. Ilig
6. Gallaaddi
7. Daratoole

Intaas iyo wax badan oo kale ayaa dagaalku ka socday. Goobahaasi waa intii cadawgu ku dhigay buugaggiisa Daraawiishtu se way ka badisaa goobaha intaas.

---

## MURTIDA SOOMAALIDA IYO GUMEYSIGA

Soomaalidu waxay leedahay Murti wanaagsan oo qiimo leh. Murtidaasi waxay ka dhaladtay dhinac walba, waxay na gaartay meel walba. Gabayo iyo Maahmaah iyo sheekooyin badan ayaa meel walba, ama fadhi la issugu yimaada ba laga sheegi jiray.

Qabiil walba oo Soomaali ka mid ahi ba, wuxuu lahaan jiray nin Gabyaa ah, oo ilaaliya maslaxada iyo danaha qabiilkiisa Shirar badan ayaa loo dhigi jiray nimanka Gabayaaga ah. Qolo walba waxay soo dirsan jirtay nin ka socda qabiilkeeda. Waxaa lagu magacaabi jiray shirkaas markii hore «Iran». Kaddib na waxaa lagu magacaabay «Goob».

Markii nin walba oo gabayaa ahi, kasso qayb galo, ayaa nimankaas la isku diri jiray. Maalintaa ninkii gabayga ku adkaada, waa la xurmayn jiray, magac-weyn na meelsha wuu kala tegi jiray. Qabiiladiisa ma ahee, kuwa kale na way xurmayn jireen. Meel walba na magaciisu wuu gaari jiray. Dadkoo idilu na wuu ka biqi jiray ninkaas gabayaaga ah. Qof walba libin ayuu u og golaa. Dadku waxay dhihi jireen «War naga daaya hebel, yuusan noo gabyine» Ninkaas gabayaaga ahi, wuxuu lahaa xoog weyn.

Wax kasta oo uu doona ba, waa la siin jiray. Dhawr sano hadduu wadto libantaas ayaa ku kale ka qaadi jiray libinta. Taasi na waxay ahayd shirkale oo loo qabto labadooda. Adduunka kale waxay la mid ahayd nimanka cayaaraha «Olimpigga» ka qaybgala.



Soomaalidu ma ay boqri jirin ninkii aan aqoon u lahayn Murtida Soomaalida. Shardi waxaa u ahayd ninka la boqrayo, ama laga dhigayo Ugaas ama Suldaan ama Garaad ama Islaw, inuu oqoon weyn u leeyahay Murtida Soomaalida. Inuu hadda na kala yaqaan qabiiloyinka uu madaxda u yahay. Xeerarka iyo Caadooyinka iyo dhaqanka dadadka kale waa inuu aqoon u leeyahay. Ninkaas boqorka laga dhigo, ama loo doorto inuu qabiilada wado, shirar badan oo kala duwan ayuu dhigi jiray. Dadka intii wax-garad ah na, wuu issugu yeeri jiray. Taladaa assagu uma goyn jirin, ee meelshii taladu u badnaadto ayuu raaci jiray.

Tala-goosadka nin keliyuhu uu goosto, Soomaalida waa laga dhawri jiray. Taassi na waxay ka duwanayd dadadka kale oo Afrika ku nool. Dadadka kale oo Afrika deggan ninka duqa ah ayaa talada u gooyn jiray keligiis. Halkaas waxaa marka ka dhaladtay hadal la issaga danbeeyo. Ninka la boqray hadduu xumaado, waa la ridi jiray, oo ku kale ayaa la Boqri jiray. Rididiisu waxay dhici jirtay markii dadku u wada badto in la rida ninkaas. Boqorka iyo niman kale oo Guddi ah (Council) ayaa cidda maamuli jiray dhaqankeeda iyo taladeeda ba.

Markii gumeysigu Soomaaliya soo galay wuu tirtiray xeerar badan oo wanwanaagsanaa. Niman duqow ku sheeg ah, oo aan dadka wakiil ka ahayn ayuu sameeyay. Lacag na wuu uqoray «Mushaar» ay bil walba qaadtaan. Nimankaasi danaha gumaysadtada ayay ilaalin jireen. Dadkana xoog ayay wax ku gelinsiin jireen. Halkaas waxaa ku dhintay Xornimadii dadku wax u dooran jiray.

Markaas kaddib gumeysigii wuxuu bilaabay inuu tirtiro Murtidii Soomaalida. Afka Soomaaligu na ma qornayn. Inuu hadda na dadka nacsiiyo afkiisa iyo aqoontiisa iyo inuu ku abuuro dadka dhallinta-yar «gumeysi nafta ah» (Spritual colonialism) siduu uu u nacsiiyo dadka wixii ay lahaa oo wanaagsanaa. Maanta waxaad aragtaa niman dhallin-yaro ah oo aan lagu soo karayn aqoontoodii mar na. Taas waxay u qabaan gadaal-u-dhac haddii ay qaadtaan Gabayadoodii iyo aqoontoodii hore. Gumeysigu meel walba waa galaa, dhinaca dhaqaalaha iyo dhinaca aqoonta, iyo fakarka iyo dhinaca maamulidda.

Soomaaliya gumeysigu wuxuu u geystay dhib weyn, waxaa yeelay wuxuu la diriray aqqontii Soomaalida oo xoogga lahayd. Inkasta ba xoogga gumeysigu ma uu awoodi karin aqoon-xoog le inuu markeliya tirtiro, ama baabàsho. Wax badan oo wanaagsan ayaa weli haray. Waxay se u baahan tahay in la nooleeyaa oo laga bilaabaa afka dhigiddiisa.

Dawladuu waa inay noolaysaa, aqoonta dadka iyo murtida ba. Guddi-weyn oo maamula, waa in la dhisaa. Taasi na waxay u baahan tahay (U.N.E.S.C.O.) iyo dawlado kale in loo cuskadaa oo durba ba laga gaaraa intii aan aqoontii dadku lumin.

## SADDEX, SADDEX, SADDEX

Waxaa la yiri: Saddexey, saddex baa timide iska tag.

*Colow! nabad baa timide iska tag.*

*Abaarey! barwaaqo baa time iska tag.*

*Cuduraw! caafimaad baa yimide iska tag.*

Saas markii la yiri, ayaa saddexdii waxyaalood mid walba ooni u hadlay.

Col wuxuu yiri: Anigu ma tegayo. Waxaa lagu yiri maxaa kugu dhacay? Maxaad u tegi weydey haddii nabadi timid?. Col wuxuu yiri. Maxaa yeelay, waxaanan u tegi karin, meel aan joogo, ayaan leeyahay. Waxaan la joogayaa ninkii weli buka, oo ka buka caloolsha, ama ninkii walaalkiis la dilay, ama kii aano suganaya, ama ba kii ciil qaba. Sidaas daraaddeed ayaan u haystaa meel aan joogo inkastoo caafimaad yimaado. Waxaa la yiri Markaas «Allaylehe waa run».

Abaari waxay tiri: Anigu na ma tegi karo. Waxaa lagu yiri: Oo maxaa dhacay; oo aad u tegi weydey? haddii barwaaqo timid? Abaaru waxay tiri: Sababta aanan u tegi karini, waxaa weeye; anigu waxaan haystaa meel aan joogo. Waxaan meel la joogayaa ninkii ku nool baryo, oo aan shaqaysan karin. Markaasaa lagu yiri abaartii: Oo haddii la waayo, nin aan shaqaysan karin, maad joogi? Naa naga tag abaar yahay?!! Abaari waxay tiri: Marka haddii la waayo, nin aan shaqaysan karin, waxaan suganayaa qofkii xooluhu dhaaffaan, oo noqda mucsur. Markaasaa dadkii yiri «Allaylehe taasi waa run»!!

Cudur na (bushi) wuxuu yiri: Anigu na ma tegi karo. Waxaa lagu yiri: Maxaa dhacay ood u tegi weydey haddii caafimaad yimid!? Cudur wuxuu yiri: Maxaa yeelay, nin meel là ma ahi. Waxaan haystaa meel aan joogo, inkastoo caafimaad yimid!

Waxaa la yiri: Xaggee haysadtaa? Cudur wuxuu yiri: Waxaan haystaa nin duq ah oo dhacay! Haddii uu caafimaad haysto meel aan ka galo ka waayimaayo. Anigu waxaan ahay cudur, geeridii dili lahayd waa aniga. Assaga keligiis na ma aha, ee kuwa yaryar oo jirrada na waan ku jiraa!! Markaasaa dadkii oo idilu yiri: «Allaylehe waa run», sida cudur sheegayaa! Aan iska daynno. Marka waxaa la waayey adduun intaasi ka maqan tahay. Dadkii wuxuu ku talshaday inuu la diriro saddexdaas, oo kula diriro saddexda kale, Abaar .... barwaaqo.

Col.....nabad. Cudur.....caafimaad. Intaas oo idilu way dirirayaan mar walba. Taasi waa nololsha dunida aan ku nool nahay joogta.



## NAAG BALOWDEY

Waxaa la yiri naag baa nin ka balowdey. Ninku na wuu jeclaa wax badan naagta. Wax badan ayuu waaniyey oo waaniyey, markii ay maqli waydey ayuu iska furay.

Naagtu na aad iyo aad bay u qurux-badnayd. Waxay ahayd naag-cas oo dheer oo timo madow le. Si wanaagsan na way issu leèkayd. Waxay ahayd naag aan laga samri karin mar na quruxdeeda.

Ninkaas gabayaaga ahi, wuxuu naagta kala mid dhigay midabkeeda sidii mareer oo kale. Bal aan aragno gabaygiisa. Wuxuu yiri:

Naagyahay! Dannood baa u weyn
Duunyadu hadday wada galshoo
Waa lagu diqoodaa haddaan
Dawgii la marayaa, dhexduu
Derintaan la laabinu dhaqsay
Diqsiqaa ku dhaca, xeeradaan
Ruuxii damiina ba qalbigu
Dudumooyinkoo lala hadlaa
Dawo ma laha naag-xumi hadday
Rabbi dooriyey hadalku waa
Dirxiraha mareer waa cas yahay
Dawliika baas waxaad ku hodi
Sidii geel diraacda dhalay
Deegaan sideed kaaga dhereg
Darka kale oo haween lihi wax badan
Darkii Caynabay kugu masleen
Anigoon ku dirin waa digii
Daydayo haddaan kuu fassaxay

Haradi Dooiloode
saalo lagu daadsho
laySSU diidayne
deri ka yeelshaaye
duug u noqodtaaye
dabaqu saarnayne
waa ka daar-xirane
damac ma yeelshaane
diiddo waanada e
kaaga darayaaye
daawashada guude
duulaan ku aqoone
oo daaffa nirigleeyey
doobka reeruhuye
kaa dukaansada e
darisyadaadiiye
damaca waallaaye
dibad wareegiiye!!!

(Cabdullaahi Muuse)

---

## ISMAACIIL MIRE

Ismaaciil Mire wuxuu ahaa nin gabayaa ah. Wuxuu na ka mid ahaa Daraawiishtii Sayid Maxamad. Gabayo badan ayuu tiriyey. Sayid Maxamad wuxuu u ahaa «Xog-haye» Maamulka iyo talada iyo siyaasadda ba wuxuu kala shaqayn jiray Sayidka.

Sayidkii markii la jabshay na ciddiisii ayuu ku soo noqday. Wuxuu ahaa nin dagaal-yaqaana gabayo guubaabo ah, ayuu tiriyey, iyo kuwo kale oo ku saabsan Daraawiishta.

Maalin assagoo meel fadhiya, ayaa waxaa u yimid wiil yar oo aabbbihiis la dilay. Markuu arkay wiilkii agoonka ahaa, ayuu naxay. Wuxuu u naxay uma uusan aari karin Dàda Ismaaciil markaas waxay ahayd dà-weyn. Si kale kuma garadtide, wuxuu ahaa duq dhacay. Ismaaciil wuxuu is yiri mindhaa wiilku aarid

buu kaa rabaa, in adoogi uu ugu aaro. Marka wuxuu issu fiiriyey dàdiisa dhacday iyo wiilka yaraantiisa.

*Gabay wuxuu ku yiri:*

Inan yahow! ilmaa igaga timid   aragtidaadiiye
Ha ii iman, ha na issoo ag marin   ha na isoo eegin
Wax ba adèer na hay oran qalbigu   way halwanayaaye
Haddaan anigu odayoobay een   eebo ridi waayey
Ashahaado mooyee haddan   aaffadii daayey
Abtirsiinyo Reer-Hagar haddii   eebbe kugu raacshay
Oo Ararsame cid kuu xigoo nafluhu   kala ayaan roone
Allaa igu og inaan aabbahaa   cidu u aarayne!!

Sidaas markuu yiri ayaa wiilkii ooyay oo iska tegay. Waxaa la sheegay wiilkii markii uu xoogaystay inuu dad badan dilay oo u aaray aabbihiis. Mar walba na wuxuu xusuusanayey gabaygii Ismaaciil Mire.

Ingriiskii wuu ku xiray Ismaaciil Mire gabaygaas.

---

## ASKAR

Markab qiiqay quuriga badeed   qoolla gudihiisa
Meelshii qassuusigu fadhiyay   qirada waayeelka
Qawlkii la soo faray askari   qaadan kari waydey
Faransiiska (1) qaarka-cad shanlaha (2)   qiradu weynaadtay
Danlahelayda (3) lagu soo qaffilay   qooffalkiyo laaska
Qalabkooda goortaan arkaa   lay qarrariyaaye
Ku qamaame qoladaannu nahay   qoys haddii la arko
Naga qaade qaadawadii dhalshiyo   qoolasta irmaana
Awrkii biyaha loo qodbaday   saarte qalabkooda
Ariga na hadday naga qalshaan   qaadte haraggiisa
Naagaha midday qurux bidaan   qoyska kula laabte
Wan u qalay qabow na ugu daray   qaaffa na u sooray
Qalqal iyo war-xumo noogu dare   qaadis iyo tuugo
Maxaan Reerka kula qaybsadaa   la iga kaa qaadye
(Caroole Maxamad)

(1) *(waa qori, bunduq)*
(2) *(waa qori)*
(3) *(waa maro)*



## MAHMAAH

Waxaa la yiri waxaa jira; waxaadan huri karin, hananna karin.

Wxaa la yiri nin yahow madaxa iyo mindida ba adaan kuu dhiibay.

Waxaa la yiri dudumo in la dugsado iyo in la dareensado laysku ma helo.

Nin la yiraahdo Aadan-Dirir ayaa wuxuu arkay assagoo duq ah, sagaaro meel maraysa oo ka cararaysa. Mar alla markay aragta ba way ka carari jirtay.

Maalintii danbe ayuu Aadan-Dirir yiri «Sow sagaaro ima baradto». Waa tan iga cararta e yaa u sheega inaan nin duq ah ahay, oo aanan ugaaranayn.

---

## REER DALAL IYO MAALIN-GUUR (Ogaadeen)

Nin Maalin-guur ah oo gabyaa ah, oo magaciisa la yiraahdo Maxamuud Aw-Cali ayaa gabay cay ah u soo dhiibay Reer Dalal. Markaas baa lagu yiri Aw-Faarax oo ReerDalal madaxdeeda ka mid ah, maxaad gabay ugu celin weydeen ninkaas u soo gabyay qoladiinna?.

Marka nin la yiraahdo -Ina-Cali Beena-ley ayaa gabay uga celiyey qoladii; Wuxuu yiri:

Waayahaan bilawgiisa gabay   waan ka baariyaye
Bàda kama akhriyin maansadii   baawirka lahayde
Xalay uun baa barkiga goor la dhigay   baan la ii furaye
Bassarkiisa laygama badshoo   waan bayimiyaaye
Buug Eebbahay buuxiyaan   beerka ku hayaaye
Aan bilaabo caaweynnu nahay   baarax nabadeede
Niriggii barooday ee cadhadu   dhinaca boogaysay
Ee baatirtuu nuugi jiray   baassihii geliyey
Dabadeed na boqolkii halaad   wada balaayeeyey
Armuu gabaygu baabkii noqdaa   dunida baaweeyey!!
Barkad iyo Bah-Hararsame qofkay   eedday bilicdeeda
Taffa-dhiig middii loo baxshoo   boqol u ruux weydey
Armuu gabaygu baabkii noqdaa   dunida baaweeyey!!
Berrinkaa wankii daaqayee   cunayey baadkiisa
Ee wiil badraamihi arkee   barida weyn taabtay
Ee kii bànaayee lahaa   beerka kala gooyey
Armuu gabaygu gaabkii noqdaa   dunida baaweeyey!!
Sidii baalidii haween   ee baqarta maalaysey
Ee caanaheedu u badteen   baq iyo faarowga
Ee boqorka Aadana u tagtee   uus baabadda u sheegay
Ee yiri lòdii kala baroo   baal ba dhan u qaybi

buu kaa rabaa, in adoogi uu ugu aaro. Marka wuxuu issu fiiriyey dàdiisa dhacday iyo wiilka yaraantiisa.

*Gabay wuxuu ku yiri:*

Inan yahow! ilmaa igaga timid aragtidaadiiye
Ha ii iman, ha na issoo ag marin ha na isoo eegin
Wax ba adèer na hay oran qalbigu way halwanayaaye
Haddaan anigu odayoobay een eebo ridi waayey
Ashahaado mooyee haddan aaffadii daayey
Abtirsiinyo Reer-Hagar haddii eebbe kugu raacshay
Oo Ararsame cid kuu xigoo nafluhu kala ayaan roone
Allaa igu og inaan aabbahaa cidu u aarayne!!

Sidaas markuu yiri ayaa wiilkii ooyay oo iska tegay. Waxaa la sheegay wiilkii markii uu xoogaystay inuu dad badan dilay oo u aaray aabbihiis. Mar walba na wuxuu xusuusanayey gabaygii Ismaaciil Mire.

Ingriiskii wuu ku xiray Ismaaciil Mire gabaygaas.

---

## ASKAR

Markab qiiqay quuriga badeed qoolla gudihiisa
Meelshii qassuusigu fadhiyay qirada waayeelka
Qawlkii la soo faray askari qaadan kari waydey
Faransiiska (1) qaarka-cad shanlaha (2) qiradu weynaadtay
Danlahelayda (3) lagu soo qaffilay qooffalkiyo laaska
Qalabkooda goortaan arkaa lay qarrariyaaye
Ku qamaame qoladaannu nahay qoys haddii la arko
Naga qaade qaadawadii dhalshiyo qoolasta irmaana
Awrkii biyaha loo qodbaday saarte qalabkooda
Ariga na hadday naga qalshaan qaadte haraggiisa
Naagaha midday qurux bidaan qoyska kula laabte
Wan u qalay qabow na ugu daray qaaffa na u sooray
Qalqal iyo war-xumo noogu dare qaadis iyo tuugo
Maxaan Reerka kula qaybsadaa la iga kaa qaadye
(Caroole Maxamad)

(1) *(waa qori, bunduq)*

(2) *(waa qori)*

(3) *(waa maro)*



## MAHMAAH

Waxaa la yiri waxaa jira; waxaadan huri karin, hananna karin.

Wxaa la yiri nin yahow madaxa iyo mindida ba adaan kuu dhiibay.

Waxaa la yiri dudumo in la dugsado iyo in la dareensado laysku ma helo.

Nin la yiraahdo Aadan-Dirir ayaa wuxuu arkay assagoo duq ah, sagaaro meel maraysa oo ka cararaysa. Mar alla markay aragta ba way ka carari jirtay.

Maalintii danbe ayuu Aadan-Dirir yiri «Sow sagaaro ima baradto». Waa tan iga cararta e yaa u sheega inaan nin duq ah ahay, oo aanan ugaaranayn.

---

## REER DALAL IYO MAALIN-GUUR (Ogaadeen)

Nin Maalin-guur ah oo gabyaa ah, oo magaciisa la yiraahdo Maxamuud Aw-Cali ayaa gabay cay ah u soo dhiibay Reer Dalal. Markaas baa lagu yiri Aw-Faarax oo ReerDalal madaxdeeda ka mid ah, maxaad gabay ugu celin weydeen ninkaas u soo gabyay qoladiinna?.

Marka nin la yiraahdo -Ina-Cali Beena-ley ayaa gabay uga celiyey qoladii; Wuxuu yiri:

Waayahaan bilawgiisa gabay waan ka baariyaye
Bàda kama akhriyin maansadii baawirka lahayde
Xalay uun baa barkiga goor la dhigay baan la ii furaye
Bassarkiisa laygama badshoo waan bayimiyaaye
Buug Eebbahay buuxiyaan beerka ku hayaaye
Aan bilaabo caaweynnu nahay baarax nabadeede
Niriggii barooday ee cadhadu dhinaca boogaysay
Ee baatirtuu nuugi jiray baassihii geliyey
Dabadeed na boqolkii halaad wada balaayeeyey
Armuu gabaygu baabkii noqdaa dunida baaweeyey!!
Barkad iyo Bah-Hararsame qofkay eedday bilicdeeda
Taffa-dhiig middii loo baxshoo boqol u ruux weydey
Armuu gabaygu baabkii noqdaa dunida baaweeyey!!
Berrinkaa wankii daaqayee cunayey baadkiisa
Ee wiil badraamihi arkee barida weyn taabtay
Ee kii bànaayee lahaa beerka kala gooyey
Armuu gabaygu gaabkii noqdaa dunida baaweeyey!!
Sidii baalidii haween ee baqarta maalaysey
Ee caanaheedu u badteen baq iyo faarowga
Ee boqorka Aadana u tagtee uus baabadda u sheegay
Ee yiri lòdii kala baroo baal ba dhan u qaybi

Ee kii balaayada lahaa
Dabadeed na billaawaha afka là
Ee kuraygu buraduu jeclaa
Ee bahalsha dhuuryadu (1) dabkii
Ee dhuxul yaroon badnayn
Ee beledka weyn oo cammiran
Een bandarigii dhammaa
Armuu gabaybu baabkii noqdaa
Ballan-qabaha Reer-Dalal inuu
Iyo inay Bahdii Maalin-guur
Beenta iyo runta ba waa dhow bay
Aan baxnaansho xaajjada halkii

Eebbe soo bixiyey
beydda lagu gooyey
looga soo bixiyey
beerka kala booday
baqalyadii raacday
saartay barihiisa
beesso laga qaadin
dunida baaweeyey!!
dunida baaweeyey!!
baanisaha keentay
kala baxaayaane
barida loo saaro!!!

(Ina-Cali Beenaley)

*(1) (dafo, ama baqalyo)*

---

## GUMEYSIGA AMHAARADA

Gabaygaan waxaa tiriyey nin la yiraahdo Faarax Cilmi (Geydh). Faarax waa nin gabyaa ah. Wuxuu se ka mid yahay nimanka gabyaaga ah oo cussub. Gabaygaan wuxuu ku siffaynayaa sida gumeysadtada Amxaaradu u gumaysanayso dadka Soomaalida ah, ee xuhunkeeda ku hoos jira.

Faarax wuxuu yiri:

Awal maanso waa taan danciyey
Waa taan dawaarka u xirayoon
Xalun baan dakhdaan iri hurdada
Aan daleeyo caawana hal bay
Dad Amxaara diidoo ka nacay
Oy duri colloobeen tan iyo
Oo lagu digeeyaan nahay
Dacwad baan diraynaye haddaan
Dawlcoyinkoo idil haddaan
Xàqqa lama dadee waa in
Beri qura inaan taa la dayin
Nimankaas dulbaaxdiyo ku cuna
Ee sida dugaag xoolo helay
Ee aan diir naxaayiyo lahayn
Ee aan dayaaniyo lahayn
War diin naguma raacaane waad
Dir na naguma raacaan awow
Dabuubta na inaan kala tagnaa
Dalkakada Ogaadeen ma rabo
Waa degalka Soomaaliyeed

toban diraacoode
daayey waayahane
laygu soo degaye
damacday laabtiiye!!
duunka iyo laabta
duudki nebi Aadan!
doog iyo abaare
U.N.O. da deeqsiinnay!
daraf u gaarsiinnay
daacad la hadlaaye
ma aha dawgiine
deribta ceeriinka
noo dudubinaaya
dib u dhaqaalaynta
duunyo naga reebta
nagu dilaysaane!!
duriyadiisiiye
daahir loo yahaye
dabaqya weyntaase
kan ugu duug roone!!



Dekkaddaas Hawaash kama xigaan
Hadduu Haile nagu sii daffiro
Dagaal iyo xumaan maan rabnaa
Haddii dibadda ruux nagaga haro
Kolley doonimaynnee haddii
Dirqi inay ku haystaan intii
Rabbi waxaa duraansaday inay

dawladaa ka lehe
hadallo deel-qaafle
inaan ku doonnaaye
daafac baan nahaye
nala ka deyn waayo
nagula doodaysa
demeg yiraahdaane!!

(Faarax Cilmi geydh)

---

## MAHMAAHYO

1. Abaal raaga, rag baa leh. Abaal soo degdega na xoolaa leh.
2. Nimaan telin jirin hadduu taliyo, nimaan tegi jirin ayaa taga. Nimaan wax qaybin jirin, hadduu qaybsho, nimaan qadi jirin ayaa qada.
3. Saddex waa xarrago: Hanti haddii aad leedahay. Qabiilo wanaagsan haddii aad ka dhaladtay. Cirrid-madow haddii aad leedahay.
4. Been fakadtay runi ma gaarto.

---

## GEERAAR

Cirkow soo dun! ciiddoy dhaqaaq, caro Alloy kaalay
Wax ba dhawran maynnee, Allow dhagaxyo soo daadi!!

(la ma yaqaan ninkii tiriyey)

Shinbir duulid badan ba hadduu
Mar uun buu libaax labadi daan

degi aqoon waayo
dalaq yiraahdaaye

(la ma yaqaan ninkii tiriyey)

---

## GABAY

Wax cadaabta loo horay dhigaa
Issagoo cibaadoonayuu
Cirshiguu ka naar mudanayaa

Culumo duub weyne
camalkii eedaaye
ina Caiow gaale

(Qammaan Bulxan)

## CABDI-GAHAYR

Qolo Issaaq ah, ayaa Cabdi-gahayr geel ka dhacday. Cabdi-ayr na wuxuu ahaa, nin gabyaa ah, oo dagaal badan. Gabaya-u waxay u badan yihiin Gubaabo, iyo Galliin. iyo Aarqudasho.

Maalin ayaa waxaa lagu yiri: Geelaagii waxaa dhacay ni-ı Issaaq ah. Gabay wuxuu ku yiri:

lee ama gumoobay ee sidii — ganadto ceebooday
lee ama guffaacada ka qaday — gùga la eegaayo
lee ama Guhaadow! waxaan geysto — lala yaabye
antayda jeeraan sidii — Guray ku ciil beelo
ıan gaal madow Harar ku dilo — giibba laga noole
ay dumar ganbacad soo xirtaan — gabaygu waa beene

Nin wadaad ah ayaa ku yiri Cabdi-gahayr, wallee waa lagu haddii aadan meel joogin. Cabdi-gahayr wuxuu ku yiri wa-dkii «Sidee meel u joogaa, haddii xoolihii oo dhan la iga ay.

Gabay wuxuu ku yiri:

ıaalada Hargeysiyo Berbera — moodka waxa keena
Adari maarsow ka dhigay — muranku waa ceebe
ı muruc addoonlow ratiga — micidu weynaadtay
kab buu addunnyada u yahay — macallimow geele
waliba micnaha loo dhaqduu — maanka ku hayaaye
ıadkaa ku toos Awgayow!! — hay makaakibine

Sidaas markii uu yiri, ayaa haddana wadaadkii ku yiri Cab-ahayr; waxaad ogaan doontaa markii xabbadi wadnaha kaaga sadto.

Cabdi-Gahayr wuxuu ku yiri wadaadkii gabay.

ıalkii Jidbaala ba ninkii — joogay baan ahaye
kay ba meel lagu jabaan — jaqallo weynaaye
ıay i jeclaa muxuu — jago i dhaafsiiyey

Wadaadkii haddana wuxuu ku yiri Cabdi-gahayr iska joog, ardiga iyo Quraanka dhigo. Geelii waad heli doontaaye Ilaa-ka baq!!

Cabdi-Gahayr wuxuu ugu jawaabay wadaadkii gabay kale. u waxay leeyihiin wadaadku wuxuu ahaa qabiilkiisa. Wa-ku wuxuu doonayey inuu nabad geela u raadsado.

Cabdi-gahayr wuxuu yiri:

ıacasa (1) awrkay dhalshiyo — aarankay wadadtay
ıiro nimaan geel lahayn — lama amaanayne
ıxaabihii hore ba waa — ku intifaaceene
ıan idin la awlaadsadaa — awr ma dhaansado e

(qaalin geela)

## AFGANBI

Geed »Canjeel» la yiraahdo oo Daraawiishtu ku shiri jirtay, ayaa niman shir ku qabsadeen. Nimankaasi waxay rabeen inay xukunka Sayid Maxamad afganbiyaan. Niman waxay ku taliyeen in «Xarunta-Sayidka» la gubo. Niman kale na waxay ku taliyeen, in laga guuro Xarunta, oo meel kale la dego. Haddii Daraawiishtu ogaadto, oo ay dagaal damacda na layska celsho.

Talooyinkaas oo idil way u suurtoobi waydey. Nin la yiraahdo Shire-Cunbaal ayaa ogaaday talshigii la qaadtay, markaas ayuu Sayidkii oo aabbihi la jooga u yimid. Taladii nimanku goosteen, ayuu u sheegay. Markaas na Sayidka waxaa haddana la joogay walaalkiis oo la yiraahdo Khaliif Shiik.

Sayidkii aroortii wuxuu amar ku bixiyey in nimankii doonayey inay afganbiyaan xarunka Sayidka iyo niman kale laysku wada daro, oo loo yeero. Goobta Sayidku joogana, markii la imaanayo qoryaha waa layska reebi jiray. Hadda na goobta Sayidku waxay lahaan jirtay meel kore oo nin askeriyuhu fuulshan yahay. Nin-kaasi wuxuu ahaa ilaaliye «Sandaleel». Wixii soo socdaba oo ku soo socda Sayidka goobtiisa ayuu fiirin jiray.

Nimankii u talshaday Sayidka waxay soo qaadteen qoryohoo-dii. Markaasaa, niman kale inta loo dhisay la wada laayey. Qaar-kii runta iska sheegay na waa la sii daayey, oo waa la cafiiyey. Nimankaas waxaa ku jiray Quuriyow iyo Axmad Fiqi oo wadaad ahaa. Niman kale oo xidid la ahaa Sayidka na way ku jireen.

Goobta xuhunka lagu qaadayey waxaa joogay nin la yiraahdo «Suudi» oo ahaa Turjubaankii Sayidka. Suudi wuxuu yiqiin Af-Ingriis iyo Carabi iyo Talyaani iyo Af-Turgi iyo Hindi.

Sayidkii wuxuu gabay ku yiri:

War Suudow sadkaa waa jannee — samac Kalaankayga
Salaama Alla yeelyow! adaan — saakin kuu ahaye
Sawdkaan ku leeyahay yuusan — salabka kaa raacine
Sonkor iyo sarreen lagu dariyo — sixin ku iidaaman
Xeeryaha sanuunadan barnida — lagu sibaaqaayo
Sulux caano-geel sogob la qalay — sararo geedeysan
Saqda-dhexe habeynkii raggaan — sahày u keenaayey
Nimankaan salaaxanahayee — saxar ka eegaayey
Nimankaan saraayada xuniyo — saha ka dhawraayey
Sidka boqola soof badan raggaan — seeri ugu yeelay
Soogaan darmaan iyo raggaan — salaba u dhiibay
Nimankaan sangootida fardaha — siiyay oranaayey
Raggaan sumuca maadhiinka iyo — saanadda u buuxshay
Nimankaan salaaddiyo u dhigay — subacyadii diinka
Sallalaahu nebigii raggaan — saamax uga doonay
Nimankaan sokeeyaha bidiyo — siiro iyo aamin
Sarsarkooda niman galiyo — suuqa gurigooda

Saxarijraday igu faleen
Niman yohow! si daran baa qalbigu
Sokeeyiyo xigaalaanan sugin
Soomaali oo idilu way
Sullankood la naar iyo gun iyo
Sinji dhaanyadii bay heliyo
Oo waa seeddiyaalshay waxeer
Sarò nama dhex ool Faarixii
Ibleys baa sallaan kula tegoo
Sucdi haddii uu leeyahay kufriga
Sakkal lagu rid Reer Samantar Khalaf
Subeerey noqdeen wiilalshaan
Markaan anigu saaffi u noqdey
San-ku-neefle oo idilu way
Nin kale ba salaaf hayla galo
Sugi maynnin Quuriyow inuu
Sakkaar waxaan u gooyiyo waxaan
Axmad Fiqi sawaab ugama helin
Sannahabadiisaanan abiid
Subaac qooqan baa iigu yimid
Inuu faranji issoo sawiray
Subbehigu wuxuu igu khattalay
Soddon goor ka badan hoog intuu
Saffiihnimo waa tuu dorraad
Markaan sebi ahaa iyo haddaan
Samaa Ilaah iiga dhigay
Saaxiibkii an yeelshaaba waa
Mar hadduunan sabankeer nafluhu
Wax ba yuunan sida saar nin qaba
Eebbow! addan kuu sabree

waan sahwinayaaye
ii saddamayaaye
saaca maanta ahe
sun iyo deybaaqe
saaruq bay helaye
saanjiga ahaaye
saadtan ii galaye
seerigaa xulaye
saaxilkay u dhigaye
uma sujuudeene
seegyey taladiiye
saakullayn jiraye
sir ila dooneene
saailahayaaye
sanada ceebeede
suqayo (1) ii tumane
sumal u daadshaaba
sadaqadaydiiye
seexan karahayne
sabada ciideede
waa u suàal qabaye
saahid baan ahaye
saancadduu falaye
gaal u saacidaye
suuro oday yeelshay
saaxir ii colehe
saymo lagu reebye
ii sablamahaynnin
salalin goorteere
suubi taladayda!!!

(Sayid Maxamad)

*(1) (warmo)*

DHIGMADA IYO FAAFINTA

**Tel. 3009** **Sanduuqa 388**

SHIRKADA SANADA

| | | |
|---|---|---|
| Gudaha: | | Sh. So. 15 |
| Dibadda: | (badda) | » » 20 |
| | (dayuuradda) | » » 60 |
| Qiimaha: | | **Sh. So. 1** |

MUQDISHOW

Jamhuuriyadda (Somalida)